Region Värmland
Smittskydd Värmland

2021-04-20 1 (2)

Covid-19, warbixinta qawaaniinta ku dhaqanka ee dadka guri wadaaga

Xaashida iska ilaalinta cudurada faafa ee dhakhaatiirta ka hortaga cudurada faafa

Maxay tahay micnaha in guri lala wadaago qof qaba covid-19?
Adigu waxaad heshay warbixintan maadaama qof aad la nooshahay ama la noolayd uu qabo covid-19 oo adiguna sidaas darteed ay dhici karto inaad ka qaatay cudurkan. Tani micnaheedu waxay tahay inuu jiro khatar ah in aad xanuusan kartid. Si loo yareeyo in cudurku ku faafo dad kale waxaa adiga waajib kugu ah inaad raacdo qaar ka mid ah qawaaniinta ku dhaqanka (eeg hoos).

Waa maxay covid-19?
Covid-19 waa caabuq faayras kaas oo badanaaba sababa calaamodo khafiif ah sida diif, dhuun xanuun, qufac iyo xummad, laakiin dadka qaarkood si khatar ah ayay u xanuusadaan oo yeeshaan dhibaatooyin neefsashada ah una baahdaan in lagu daryeelo isbitaal. Calaamadaha kale ee covid-19 waxay ahaan karaan muruq xanuun, madax xanuun, daal, dareenka urta iyo dhadhanka oo xumaada iyo dhibaatooyin caloosha oo wata shuban.

Sidee baa laysu qaadsiiyaa covid-19?
Covid-19 waxaa laysku qaadsiiyaa waxa loogu yeero dhibac- iyo istaabasho ku qaadsiin. Marka uu qofi qufaco, hindhiso, hadlo, heeso ama qeyliyo waxaa hawada ku abuurmaya dhibco si aad ah dadka cudurka u qaadsiiya. Markaas ayuu cudurku ku dhacayaa qofka u dhaw qofka buka. Marka ay dhibcuhu ku dhacaan meelo ama alaab dusheeda maaddooyinka cudurka faafiya wey ka sii gubdi karaan halkaas, badanaaba dhinaca gacmaha. Qofka cudurka la qaadsiiyay wuu qaadsiin karyaa dad kale horbaba inta aysan calaamado cudur ku billaaban. Laga soo billaabo marka uu qofku cudurka qaadyo ilaa iyo inta uu ka xanuunsanayo (wakhtiga soo ridashada cudurku) waxay u dhexeysaa 2 ilaa iyo 14 maalin, inta ugu badanse waa shan maalmood.

Maxay yihiin xeerarka isla dhaqmidda ee khuseeya xiriirrada qoyska?
Covid-19 waa khatar dadweyne iyo cudur bulshada khatar ku ah sida uu qabyo xeerka ka hortaga cudurada la kala qaado. Qof guri la wadaaga ahaan qof qabo covid-19 waxaad ku xisaabsantahay qof looga shakisanyahay cudurka ahaan, waana dhici kartaana in aad dadka qaadsiisid cudurka. Si aad u joojisid in aad cudurka qaadsiisid dad kale waa in aad ku dhaqanto qawaaniinta wada dhaqanka inta lagu jiro wakhtiga lagu sheegay.
Qawaaniinta ku dhaqanka micnahoodu waa in:

- aadan aadin shaqo, iskool ama dugsi xannaano. aad shaqayso adigoo guriga jooga iyo waxbarashada iyadoo aan la joogin goobta wax lagu barto way fiicantahay. Haddii aysan suurta gal kuu ahayn in aad guriga ka soo shaqeysid waxaad Qasnadda ceymiska ka codsan kartaa lacagta qofka cudurka sida. Adigu maaha inaad iyanna ka qayb-qaadato hawlaha xilli-firaaqaha, meelaha aad xiriir kula yeelanayso dad kale sida tusaale ahaan goobaha isboortiga.
- ay khasab tahay in aad raacdid nidaamyo nadaafadeed oo gaar ah: Waa in aad si fiican u hubisaa nadaafadda gacmahaaga (dhaq gacmaha), ku qufacdaa, kuna hindhistaa laabatada xusulka ama istiraashada sanka, aadanna ula jeesan dadka kale dhankooda.
- waa in aad sheegtaa in aad guri kula nooshahay qof qaba covid-19 haddii aad la xiriirto shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo bukaanka.

Waalidka ayaa mas'uul ka ah in carruurta guriga joogto ay raacdo xeerarka wada dhaqmidda. Markay noqoto dhanka xiriirka daryeelka bukaanka markaas waalidka ayaa mas'uul ka ah inay u sheegaan in ilmahan uu guri la wadaago qof qaba covid-19.

Maxay tahay in aan sidoo kale sameeyo si aan qaadsiinta cudurka dadka kale uga ilaaliyo?
Sida uu dhigayo xeerka ilaalinta cudurrada lays qaadsiiyo waxaa waajib ku ah qofka qaba, ama looga shakisanyahay cudur la kala qaado in uu sameeyo waxa laga rabo si dadka kale looga ilaaliyo cudurada la is qaadsiiyo (waxa loogu yeero waajibka ilaalinta). Tani micnaheedu waa in adigu inta lagu jiro wakhtiga ay waajib kugu yihiin qawaaniinta ku dhaqmida aanad la kulmin dad kale oo aan

ahayn kuwa ku nool gurigaaga oo aanad ku safrin gaadiidka dadweynaha. Adigu waad joogi kartaa banaanka markay suurtagal tahay inaad masaafo u jirsato dadka kale. Adigu wixii lagama maarmaan ah waad ka soo iibsan kartaa tusaale ahaan dukaanada raashinka iyo farmasiga iwm. Haddii aad xiriir dhow la leedahay shaqaalaha daryeelka oo ay ku jiraan shaqaalaha dadka waayeelka ah ugu shaqeeya gurigooda waa khasab inaad iyaga u sheegto inaad guri la wadaagto qof qaba covid-19.

Wakhti intee leeg ayay ansax yihiin qawaaniintan ku dhaqanka?
Laga billaabo marki laguu sheegay ilaa iyo marka ay ka soo wareegto 7 maalmood marki covid-19 laga baaray qofka qoyska ka mid ah. Markaas ka dib ayaad dib ugu noqon kartaa shaqada ama iskoolka haddii weli aanad lahayn wax calaamado ah.. Haddii aad iska qaaday shay-baarka PCR waa khasab inaad sugto jawaabta baaritaanka.

7 maalmood oo dheeraad ah waa in aad si waddid in aad u feejignaatid calaamadaha cudurka, aad shaqada ka bannaanka iyo iskoolka kula kulantid inta ugu yar ee dad ah ee suurta gal ah, aadna ka baaqsataa hawlaha xilliga firaaqada.

Yaan soo geleyn xeerarkaas wada dhaqmidda?
Dadka sanad barkii ugu dambeeyay uu ku dhacyay covid-19 ama ugu yaraan seddax usbuuc ka hor qaatay goojadi ugu horreysay ee tallaalka uma baahna in ay raacaan xeerarka wada dhaqmidda ee tusaale ahaan waa ay sii aadi karaan shaqadooda ama iskoolkooda.

Ma u baahanahay in aan baaritaan isku sameeyo?
Adigaaga ah xiriirka qoyska waa in aad baaritaan isku sameysid, iyadoo laga duulayo tilmaamooyinka goballada, xitaa haddii aadan calaamado cudur lahayn. Haddii aad isku sameysay baaritaanka PCR-ka waa in aad sugtaa jawaabta baaritaanka inta aadan u laaban shaqadaada, iskoolkaaga ama dugsigaaga xannaannada.

Haddii aad ka shaqeysid rugta daryeelka dadka da'da ah ama meel ay joogaa bukaanno si gaar ah u nugul waa in laguu baaraa si waafaqsan tilmaamooyinka maxalliga ah, xitaa haddii uu covid-19 horay kuugu dhacyay ama aad is tallaashay.

Maxaan sameeyaa haddii aan isku arko calaamadaha cudurka?
Haddii aad isku aragto calaamado inta lagu jiro wakhtigan waa inaad baaritaan iska qaado oo aad guriga joogto ilaa inta aad helayso jawaabta baaritaanka, xitaa haddii isu geynta wakhtiga aad markaasi u baahantahay inaad guriga joogto ay ka badantahay 7 maalmood.

Maxaan sameeynayaa haddii aan daryeel caafimaad u baahanahay covid-19 ama cudur kale awgiis?
Adigu maaha inaad toos u tagto rug caafimaad/rugta deg-degga ee dhow/isbitaal. Marka hore telafoon kula xiriir Hagida Daryeelka 1177 si aad u hesho caawimaada in laguu tilmaamo meesha saxda ah ee daryeelka caafimaadka oo aad u sheegtaa inaad guri la wadaagto qof qaba covid-19. Haddii aad u xanuunsatid si nolosha khatar gelineysa wac 112.

Sidee ayaan rafcaan uga qaadan karaa qawaaniintayda ku dhaqmida?
Haddii lagugu soo rogay qaanuun ku dhaqmid oo aad u aragto inuu khalad yahay waxaad la xiriiri kartaa dhakhtarka ka hortaga cudurada faafa ee gobolkaaga.